**HAGAHA LOOGU TALAGALAY**

# Qoysaska ku jira Dacwadaha Illaalinta Ilmaha

*Waxaa daabacaday*

Laanta Garsoorka ee Maine
Xafiiska Maamulka Maxkamaddaha

**Janaayo 2018**

# MACLUUMAADKA MUHIIM AH

Isticmaal booskaan inaad ku qorto taariikhdaha, waqtiyada, iyo goobaha dhageysiga dacwadaha iyo macluumaad kale. Weydii qareenkaaga wax ku saabsaanmacluumaadwalba oo aan kula cadeyn.

**Qareenkaaga**

Magaca ______________________________

Ciwaanka ______________________________

Telefoonka ______________________________

I-meelka ______________________________

**Waaxda Shaqaalaha dacwada**

Magaca ______________________________

Telefoonka ______________________________

I-meelka ______________________________

Magaca kormeeraha ______________________________

Telefoonka ______________________________

I-meelka ______________________________

**Wakiilka maxkamaddu magacawday (GAL)**

Magaca ______________________________

Telefoonka ______________________________

I-meelka ______________________________

***Baaraha Daryeelka Carruurta**

Telefoonka: (207) 213-4773

I-meelka:
ombudsman@cwombudsman.org

**Dhageysiga Dacwada Horudhaca ah ee Illaalada**

Taariikhda & Waqtiga ______________________________

Goobta ______________________________

**Barnaamijkaan wuxuu siiyaa qofka tababaran inuu eego cabashooyinka markii aysan kuu suurtogelin inaad arin la xalisid Waaxda. Barnaamijka Baaraha wuu ka madaxbanaanyahay Waaxda.*

**Shirka Maamulka Dacwada**

Taariikhda & Waqtiga ______________________________

Goobta ______________________________

**Jadwalka Booqashada**

Maalin (maalmaha) iyo Waqtiga (saacadaha) ______________________________

Goobta ______________________________

**Kulanka Kooxda Qoyska**

Taariikhda & Waqtiga ______________________________

Goobta ______________________________

## TAARIIKHAHA Maxkamadda

**Dhageysiga Dacwada Halisgelinta**

Taariikhda & Waqtiga ______________________________

Goobta ______________________________

**Dhageysiga Dacwada Dib-u-eegida Garsoorka**

Taariikhda & Waqtiga ______________________________

Goobta ______________________________

**Dhageysiga Dacwada Dub-u-eegida Garsoorka (labaad)**

Taariikhda & Waqtiga ______________________________

Goobta ______________________________

**Joojinta Dhageysiga Dacwada Xuquuqaha Waalidnimada**

Taariikhda & Waqtiga ______________________________

Goobta ______________________________

WAATIXRAAC KALIYA

# TUSMOOYINKA

HORDHACA — Maxaa loogu talagalay hagahan? .......... 2

QEYBTA 1 — Maxaa dacwad maxkamadeed loo bilaabatay? .......... 2

QEYBTA 2 — Waa maxay Amarka Illaalinta Hordhaca ah (PPO)? .......... 4

QEYBTA 3 — Goormee ayay iisuurtogaleysaa inaan maxkamad aado haddii PPO la bixiyay? .......... 4

QEYBTA 4 — Waa maxay waraaqaha ku jiro dacwada illaalinta ilmaha? .......... 6

QEYBTA 5 — Waa maxay Shirka Maamulka Dacwada oo goorma la qabtaa? .......... 8

QEYBTA 6 — *Waa maxay Dhageysiga Dacwada Halista ah iyo goorta la qabanayo?* .......... 8

QEYBTA 7 — Maxaa loo qabtaa Dhageysiga Dacwada ee Dib u eegida garsoorka? .......... 10

QEYBTA 8 — *Waa maxay Joogteynta Qorsheynta Dhageysiga Dacwada iyo goorta la qabanayo?* .......... 11

QEYBTA 9 — Waa maxay Joojinta Xaquuqaha Shaqsiga? .......... 11

QEYBTA 10 — Racfaanada .......... 12

QEYBTA 11 — La shaqeynta qareenkaaga .......... 12

QEYBTA 12 — La shaqeynta shaqaalaha dacwada ee Waaxda .......... 13

QEYBTA 13 — Barnaamijka Baaraha Daryeelka Carruurta Maine .......... 13

QEYBTA 14 — Xaquuqda awowyada/ayeyooyinka iyo kuwa kale ee ka qeybgalayo oo ka qeybqaadanayo dacwada .......... 14

QEYBTA 15 — Dulmarka xaquuqaha iyo masuuliyadaha dacwada PC .......... 15

LIFAAQA — macluumaadka guud .......... 17

**Diidmada Muhiimka ah**
Sharuudaha gaarka ah ee la xiriiro dacwadaada waxay ku jirtaa sharciyada, xeerarka, iyo amarada maamulka. Kani waa hage kaliya.

WAA TIXRAAC KALIYA

## HORDHACA — Maxaa loogu talagalay hagahan?

*Hagahan wuxuu kaa caawin doonaa fahamka xaquuqahaaga iyo masuuliyadaha, iyo waxa ka dhacayo Dacwada Illaalinta Ilmaha (Maganta ama dacwada "PC").*

Hagaha wuxuu sidoo kale ka caawinayaa xubnaha qoyska iyo dadka kale ee la leh xiriir weyn canugaaga fahmaan sida ay ugu suurtogeli karto ka qeybgalida ama ka qeybqaadashada dacwada PC.

Dacwada PC waxay noqon kartaa mid aad murugu u leh oo jah wareer u ah Waalidiinta iyo carruurta.

Hagahan wuxuu kugu caawinayaa ogaanshaha waxa nidaamka noqonayo.  Hubi inaad aqrisid hagaha oo odil, sababtoo ah jawaabaha su'aalahaaga ayaa ka muuqdaan guud ahaan hagaha.

Ma ahan in dhageysi dacwad walba ama dhacdo lagu sheegay hagahan ay ka dhici kartaa dacwada PC oo walba.  Sharciyada quseeya dacwadaha PC waa isku mid, laakin dacwad walba waxay ku lug leedahay xaqiiqooyin kala duwan. Dacwadaha qaar dhaqso ayaa la xalin karaa. . Dacwadaha kale waxay qaadan karaan bilooyin badan si loo dhammeystiro.

Fadlan maskaxda ku hay in ujeedada dacwada PC ay tahay ku haynta carruurta badbaado iyo ka caawinta qoysaska inay sameystaan guri badbaado ah carruurtooda. Dacwada micnaheeda ma ahan in la ciqaabo Waalidiinta ama la kala gooyo qoysaska. Badelkii, hadafka waa isku haynta qoysaska, iyo u celinta carruurta waaladiintooda haddii laga qaaday muddo waqti ah.

**Sheyga ugu muhiimsan ee aad sameyn kartid ee aad ku caawineysid nafsadaaada iyo canugaaga oo inta lagu jiro dacwada waa:**

- La soco oo la shaqey qareenkaaga;
- Aad dhageysi walba iyo kulanka dacwadaada; iyo
- Hel adeegyada iyo taageerooyinka laga yaabo inaad ugu baahatodinaad ku caawisid nafsadaada iyo qoyskaaga.

## QEYBTA 1 — Maxaa dacwad maxkamadeed loo bilaabatay?

Dacwada PC caadi ahaan waxay bilaabataa markii Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada (Waaxda) ay u gudbiso waraaqaha Maxkamadda Degmada. Tani waxay ku dhici kartaa kadib markii Waaxda baarto wargelinta xadgudubka ama dayacaada ku saabsan canugaaga. Haddii canuga kula noolyahay, shaqaalaha dacwada adiga horaan kula soo xiriiray ama kala shaqeynayo qoyskaaga arrimaha badbaadada ee canugaaga quseeya.

**Sababaha Waaxda laga yaabo inay u baarto waxaa ku jiro:**

- Canugaaga leeyahay dhaawacyo dhab ah, aan la sharaxin;
- Canugaaga yar kaligiisa laga tagay ama ku jiro xaalad halis ah;
- Canugaaga uu qabo dhibaatooyin caafimaad ama baahiyada caafimaad oo aan la daboolin; ama
- Baahiyada kale muhiimka ah ee canugaaga aan la daboolin.

**Erayo sharci ayaa lagu isticmaalay hagidaan. Haddii aadan hubin waxa erayo walbo micnahoodayihiin , weydii qareenka.**

Baaritaanka waaxda waxay sababi kartaa wargelin loo yaqaan "Qiimeynta Illaalinta Carruurta" (Qiimeynta). Kadib sameynta Qiimeynta, Waaxda waxay hormarin kartaa Qorshaha Badbaadadasi canugaaga badbaado loogu hayo. Waa muhiim in lala shaqeeyo Waaxda si ay ula wada imaadaan Qorshaha Badbaadada.

Inta badan qoysaska waxay ogolaadeen inay la kulmaan oo la hadlaan shaqaalaha dacwada inta lagu jiro Qiimeynta. Inta badan, Waalidiinta waxay aadeen hal Kulamada Kooxda Qoyska ama ka badan opo loogu shaqeynayo arimaha badbaadada.

Haddii aad dooratid inaadan la hadlin shaqaalaha dacwada, ha kala shaqeyn baaritaanka, ama ha raacin Qorshaha Badbaadada, shaqaalaha dacwada ayaa sii wadayo Qiimeynta sida looga baahanyahay sharciga. Haddii Waaxda aaminsantahay inay jirto "halis markaas ah waxyeelo dhab ah" ku ah canugaaga, ama haddii canugaaga uu ku jiro 'xaalado halis ah" (shuruudaha sharciga ee garsoorahaaga kuu sharxi karo adiga), waxay ka dib weydiin kartaa maxkamadda inay ka qeybgasho. Kaliya maxkamadda ayaa amri karto in laga saaro daryeelkaaga.

Haddii Waaxda aaminsantahay in canugaaga halis waxyeelo dhow ku jiro, Waaxda ayaa kuu xareyneyso waraaqaha maxkamadda ee loo yaqaan "Codsiga Amarka illaalinta Hordhaca ah" (sidoo kale loo yaqaan "Codsiga PPO"), kaas oo, haddii la siiyo, u ogolaaneyso Waaxda inay markiiba ka saarto canugaaga daryeelkaaga.

Waaxda waxay sidoo kale xareyneysaa warqada loo yaqaan "Codsiga Amarka Illaalinta Carruurta" (Codsiga), bilow sababaha maxay u aaminsantahay in canugaaga ee halista ku jiro. Waaxda waxay xareyn kartaa Codsiga laakin ma ahan Codsiga PPO markii aysan ku weydiineynin maxkamadda inaad markiiba qaadid maganta canugaaga. Xaaladaan,canugaaga wuxuu ku hari karaa gurigaaga, ama wuxuu joogi karaa guriga qaraabada ka qeyb ahaan Qorshaha Badbaadada. Sida lagu sharaxay bogga xiggo, waxaad dhawaan aadeysaa maxkamadda haddii maxkamadda soo saarto PPO.

WAA TIXRAAC KALIYA

## QEYBTA 2 — Waa maxay Amarka Illaalinta Hordhaca ah (PPO)?

Haddii Waaxda aaminsan yihiin in ay jirto halis waxyeello ku ah canugaaga, waxay weydiin kartaa maxkamadda inay ku amarto in canugaaga laga saaro daryeelkaaga isla markaas. Waraaqaha Waaxda soo dirtay waa Codsiga iyo Codsiga PPO. Maxkamadda caadi ahaan waxay xukuntaa Codsiga PPO isla markaas.

Weydiinta maxkamadda PPO waa degdeg, markaa waxaa laga yaabaa inaadan helin nuqulada waraaqaha maxkamadda illaa ka dib marka maxkamadda ay go'aansato in lagu siinayo PPO. Haddii maxkamadda ogolaato codsiga Waaxda, adiga iyo waalidka kale canugaaga waxaad helaysaan fursada dhageysiga dacwada. Adiga iyo waalidka kale canugaaga waxaa midkiiba u xilsaarayaa qareen maxkmadda. (Eeg Qeybta 11 wixii macluumaadka dheeraad ah.) Dhageysiga dacwada, Waaxda waxay u baahaneysaa inay cadeyso in badbaadada canugaaga ay ku jirto halis dhow. Waxaad heleysaa fursad aad isaga difaacdo dacwada Waaxda.

Haddii maxkamadda bixiso PPO, amarka ayaa sheegayaa in canugaaga la joogayo qaraabo la ansixiyay illaa maxkamadda go'aansato inay badbaado u tahay canuga si guriga ugu soo laabto. Haddii qaraabada la ansixiyay aan la heli karin si daryeele ugu ahaado canugaaga, isaga ama iyada waxaa lagu meeleynayaa xannaanada carruurta.

Haddii maxkamadda aysan bixinin PPO, tani micnaheeda ma ahan in dacwada dhammaatay. Maxkamadda weli waxay u ballansantahay dhageysiga Codsiga Waaxda intal agu jiro qiyaastii 120 maalmood (qiyaas ahaan afar bilood) ka bilow markii Codsiga la xareeyay.

## QEYBTA 3 — Goormee ayay iisuurtogaleysaa inaan maxkamad aado haddii PPO la bixiyay?

Haddii maxkamadda bixiso PPO, waxaad heleysaa fursad ay Waaxda ku caddaynayso dacwadeeda dhageysiga dacwada garsooraha hortiisa. Dhageysigaan wuxuu balansanyahay inta lagu jiro 7-14 maalmood (ama ka dhaqsi badan haddii qareenkaaga codsado iyo maxkamadda u suurtogaleyso inay sidaas sameyso). Waxaad heleysaa taariikhda ka hor waqtiga. Illaa maxkamadda ogaataa inay jirto sabab xoogan oo aan sidaas lagu sameyn, shaqaalaha dacwada ee Waaxda sidoo kale way kula shaqeynayaan si aad u diyaarisid booqashooyin joogta ah ee canugaaga inta lagu jiro toddoba (7) maalmood gudahood markii PPO la bixiyo.

WAATIXRAACKALIYA

## A. A. Miyaa la ii sheegayaa halka canugeyga joogo?

Inta badan, haa. Illaa Codsiga Waaxda dhaho in siideynta warbixintaan ay waxyeelo ku gaysan karto canugaaga, daryeelaha, ama Waaxda shaqaalaha dacwada, waraaqaha maxkamadda ee aad ku heshid PPO waxaa ku jiro:

- Goobta uu canugaaga joogayo; iyo
- Magaca shaqaalaha dacwada ee Waaxda iyo lambarka taleefonka shaqada.

Fadlan kala xiriir shaqaalaha dacwada ee Waaxda la yeelashada booqashada canugaaga.

## B. Sidee ayaan u diyaariyaa dhageysiga PPO?

Waa inaad heshaa nuqulada PPO iyo waraaqaha kale ee xisaabinta dhageysiga dacwada ka hor. Waraaqaha waxay qorayaan magaca iyo lambarka taleefonka qareenka ay maxkamadda u xilsaartay inuu adiga kugu matalo dacwada, haddiiba aad u qalantid dhaqaale ahaan. Haddii magaca qareenka loo xilsaaray inuu adiga ku matalo uu san ku jirin waraaqaha maxkmadda, la xiriir xafiiska karaaniga ee maxkamadda ku qoran warqada macluumaadka. Waalidka kale ee canugaaga waxaa sidoo kale loo xilsaarayaa qareenkiisa ama qareenkeeda gaarka ah.

> Waa muhiim in la aqriyaa waraaaqaha maxkamadda ka hor dhageysiga dacwada. Sidoo kale waa muhiim in la soo waco qareenkaaga isla markaas. Kala hadal dacwadaada iyo waxa aad ku dhaheysid maxkamadda ee qareenkaaga.

## C. Waxa ka dhaco dhageysiga dacwada PPO?

Dhageysiga dacwada PPO, waxaad heleysaa mid ka mid ah labo dooqyo: waxaad u ogolaan kartaa inaad u fasaxdid iPPO in ay sii shaqeyso illaa laga gaarayo heerka xiga ee dacwada, ama ay u baahan Waaxda inay caddayso dacwadeeda maxkmadda. Haddii aad oggolaatid PPO, waxaad u fasaxaysaa in Waaxda sii wado inay l si ku meelgaar ah maganta canugaaga. Haddii dhageysi dacwo la qabto, Kaaliyaha Qareenka Guud (AAG) ayaa u soo bandhigayo garsooraha dacwada Waaxda. Qareenkaaga wuxuu kugu wakiil kaga noqonaya kiiskaaga. Waxaad helaysa furasad aad ku marqaati furto.

Dadka kale ee ka marqaati furayo dhageysiga dacwada PPO waxaa ku jiro waalidka kale ee canuga, qofka u xilsaartay maxkamadda oo ahaanayo "Wakiilka maxkamaddu Magacawday" ama "GAL" (fiiri Qeybta 4.D. wixii macluumaadka ah ee ku saabsan Wakiilkamaxkamaddu Magacawday), iyo qarabada waalidiinta koruiyada oo daryeela ilmahaaga. Dacwadaha PC uma furna bulshada, idhammaan diiwaanadana waa qarsoodi.

WAATIWAACKALIYA

Dhageysiga dacwada ka dib, maxkamadda ayaa go'aansaneyso haddii PPO sii soconayo iyo waxa xiga ee dhacayo.

Haddii canugaaga kuu jiro maganta Waaxda, Waaxda waa inay hormarisaa Qorshaha Mideynta oo laguugula mideynayo canugaaga, illaa ay muujiso sababo wanaagsan oo aan sidaas lagu sameyn. Haddii maxkamadda heshaa “xaqiiqda xadgudubka” oo xaalada (shuruuda sharciga ee qareenkaaga kuu sharaxi karo), maxkamadda waxay u sheegi kartaa Waaxda inaan loo baahnayn diyaarinta Qorshaha Mideynta. Qeybta 5aad waxaa ku jira macluumaadka badan oo Qorshaha Mideynta ah.

Aad ayay muhiim kuugu tahay inaad ka qeybgashid oo aad ka qeybqaadatid dhageysiga dacwada PPO. Haddii aadan ka qeybgelin, xaquuqahaaga waalidnimada halis ayay geli karaan.

## QEYBTA 4 — Waa maxay waraaqaha ku jiro dacwada illaalinta ilmaha?

Waraaqaha qaarkood ee lagu xareeyay dacwada PC horay ayaa loogu sheegay hagidan. Halkaan waa laga heli karaa macluumaadka badan oo mid walba ku saabsan:

### A. Codsiga

Codsiga wuxuu ka kooban yahay hal ama bayaano badan ama sababo Waaxda ay u weydiineyso maxkamadda inay ku lug lahaato qoyskaaga. Bayaaanada ku jira Codsiga waainay caddeeyaan Waaxda. Ujeedada dhageysiga dacwada waa go'aansashada haddii ay jirto cadeyn lagu xisaabtami karo ee lagu tageeraayo Codsiga.

### B. Amarka lagu magacaabayo qareen adiga ku matalo

Isla waqtiga Codsiga la xareeyay, maxkamadda waxay u xilsaartay qareen waalid walba ama masuul sharci ah. Samee qoraalka magaca qareenkaaga iyo lambarka taleefonka oo la xiriir isaga ama iyada sida ugu dhaqsiha badan oo suurtogalka ah si aad ugu diyaar garowdid dhageysigaaga. Haddii aan qareen loo xilsaarin, waxaad la xiriiri kartaa xafiiska karaaniga ee ku yaalo maxkamadda halka dacwada laga dhageysanayo oo wixii macluumaadka ah ee ku saabsan haysashada qareenka laguu xilsaaray.

### C. Dhaarta Dhaqaalaha Illaalinta Ilmaha

Waalid walba iyo masuulka sharciga ee loo xilsaaray qareenka waa inuu xareeyaa bayaanka dhaarta ee ku saabsan daqligiisa ama daqligeeda iyo xaalada dhaqaalaha ee maxkmadda. Foomkaan waxaa loo yaqaan Dhaarta Dhaqaalaha Illaalada Carruurta.

WAA TIXRAAC KALIYA

Waxaa lagu weydiin karaa inaad la kulantid baaraha dhaqaalaha ee guriga maxkamadda ee taariikhda iyo saacada lagu tilmaamay waraaqaha maxkmadda. Waxaad u baahaneysaa inaad buuxisid macluumaad daqligaagaa iyo xaalada dhaqaalaha. Kadib markii aad dhameystirtid foomka, maxkamadda ayaa go'aansaneyso haddii la sii joogteynayo ama aan la sii joogteynen bixinta qarashka qaar ama dhammaan qarashaadka loogu xilsaaray qarashaadka Gobolka. Waalidiinta ama masuulada sharciga ee aan xareyn Dhaarta Dhaqaalaha Illaalada Carruurta waxay lumin kartaa qareenkooda maxkamadda u xilsaaray.

## D. Amarka lagu magacaabayo Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL)

Canugaaga wuxuu helayaa qof ay magacowday maxkamadda oo illaaliso xiisahiisa ama xiisaheeda ugu wanaagsan. Qofkaan waxaa loo yaqaan Wakiilka maxkamaddu Magacawday ama GAL. Qofkaan uma shaqeeyo Waaxda, laakin waa xisbi dabiici ah oo baranayo canugaaga iyo qoyska.

Shaqada Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL) waa isu keenida macluumaadka la xiriirta ee ku saabsan qoyskaaga. Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL) wuxuu sameyn sidan isaga oo eegayo diiwaanada iyo wargelinada, la hadlida canugaaga, iyo inuu adiga kula hadlo iyo dadka kale daryeelay ama xanaaneeyay canugaaga. Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL) waxay u soo qoreysaa maxkamadda oo ay ku jiraan tallooyinka ku saabsan waxa Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL) aaminsantahay ee xiisaha canugaaga ugu wanaagsan. Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL) waa inuu sidoo kale u sheegaa maxkamadda rabitaanka canugaaga waxa uu yahay.

Haddii aadan fahmin qeyb walba ee Codsiga ama waraaqaha kale ee maxkmadda, weydii qareenkaaga. Fiiri Qeybta 11, “La shaqeynta Qareenkaaga,” wixii macluumaadka dheeraad ah ee ku saabsan sida qareenkaaga kugu caawin karo dacwada PC.

WAA TIXRAAC KALIYA

## QEYBTA 5 — Waa maxay Shirka Maamulka Dacwada oo goorma la qabtaa?

Shirka Maamulka Dacwada (CMC) wuxuu la kulmayaa garsooraha si looga hadlo waxa dhacay iyo waxa ka dhacayo dacwada. Haddii Waaxda aysan weydin PPO, tani waxay ahaaneysaa taariikhdaada maxkamadda ugu horeyso. Adiga, waalidka kale ama masuulka sharciga ah, qarenada idin matalayo mid walboo idinka ah, Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL), iyo AAG waxay matalaysaa Waaxda dhammaan ka qeybgala. Shirka Maamulka Dacwada (CMC), maxkamadda waxay ka ogaatay qareenada inta waqti ahlooga baahanyahay heerka xiga ee dacwada—Dhageysiga Dacwada Halista ah—iyo inta marqaati loogu yeerayo marqaati furka. Shirka Maamulka Dacwada (CMC) ma ahan dhageysi dacwo. Ma jiraan cadeyn ama marqaati kac la keenay Shirka Maamulka Dacwada (CMC).

> **Shirka Maamulka Dacwada (CMC) waxaa lagu qabtaa gudaha dhowr isbuuc kadib bilowga dacwada.**

Shirka Maamulka Dacwada (CMC) waxaa lagu qabtaa gudaha dhowr isbuuc ka dib bilowga dacwada. Samee qoraalka xogta, saacada, iyo meesha Shirka Maamulka Dacwada (CMC).

Meeshaas ama u dhow waqtiga Shirka Maamulka Dacwada (CMC), Waaxda waa inay xareysaa Qorshaha Mideynta. Qorshaha wuxuu dajiyay waxa Waaxda ay tahay inay sameyso iyo waxa adiga aad sameyneysid. Qorsho walba waxaa si gaar ah loogu sameeyaa Waalidiinta shaqsiga. Qorshaha waa qeyb aad muhiim ugu ah dacwada sababtoo ah ka qeybqaadashadaada waxay kugu caawin kartaa hormarka dhinacyada la midoobida canugaaga. Hubi inaad la dulmartid qareenkaaga iyo inaad fahamtid.

## QEYBTA 6 — *Waa maxay Dhageysiga Dacwada Halista ah iyo goorta la qabanayo?*

Dhageysiga Dacwada Halista ah guud ahaan wuxuu ku dhacaa 120 maalmood gudahood (qiyaastii afar bilood), ka bilow taariikhda Codsiga la xareeyay, illaa ay jiraan sababo wanaagsan ee lagu daahinayo. Maxkamadda waa inay gaartaa go'aan haddii la sameynayo Amarka Halista oo 120 maalmood gudahood ah.

Ujeedada Dhageysiga Dacwada Halista ah waa u soo bandhigida cadeynta maxkmadda marka maxkamadda ayaa go'aansan karta haddii canugaaga uu ku jiro "xaaladaha halista" ee fayo qabkiisa ama fayo qabkeeda ama daryeelka. "Halista" waxaa ku jira waxyaabaha kale, waxyeelo dhab ah, ama halis dhab ah ku ah canugaaga. Weydii qareenkaaga inuu sharxo eraygaan si aad u buuxdo haddii aadan hubin waxa loola jeedo xaaladaada.

WAA TIXRAAC KALIYA

Haddii Waaxda aysan weydiin PPO (fiiri Qeybta 2), Dhageysiga Dacwada Halista wuxuu noqonayaa dhageysiga ugu horeeyo oo xaalada markii maraatiga ku marqaati maxkamadda furayo.

Ka hor Dhageysiga Dacwada Halista ah way bilaabaneysaa, qabyo qoraalka Amarka Halista adiga iyo qareenkaaga ayaa loo siiyaa inaad eegtaan. Amarka wuxuu sheegayaa sababaha helida halista. Haddii aad ku raacdo amarka qabyo qoraalka, waxaad gelin kartaa amarka adiga oo heshiis aan laheyn dhageysi dacwo. Garsooraha wuxuu ku weydiinayaa su'aalaha ku saabsan amarka lagu hubinayo inaad fahamtay oo aad ku raacsantahay. Haddii aadan ku raacin amarka qabyo qoraalka ama aadan ku raaci karin, maxkamadda waxay qabaneysaa dhageysi dacwo.

Haddii aad rabtid inaad dhageysi dacwo yeelatid, maxkamadda way dhageysaneysaa si ay ugu cadeyso Waaxda, ee adiga iyo waalidkaaga kale ama masuulka sharciga, iyo Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL).

Kadib dhageysiga dacwada cadeynta, maxkamadda waxay go'aansatay haddii halis ay jirto. Haddii maxkamadda go'aansato inaysan jirin wax halis ah, dacwada way dhammaatay iyo canugaaga waxaa lagu soo celinayaa daryeelkaaga (ama ku harayaa daryeelkaaga, haddii canug aan laga saarin PPO ama Qorshaha Badbaadada).

Haddii maxkamadda ogaato in halis ay jirto, maxkamadda waxay sameyneysaa amar. Sida horay loo sheegay, amarka wuxuu u baahanayaa in Waaxda ka shaqeyso dhinaca mideynta adiga iyo canugaaga, illaa maxkamadda ogaatay xaqiiq xadgudubka ee dacwadaada. Waxaad bilaabeysaa inaad la shaqeysid shaqaalaha dacwada oo cusub ee ka socdo Waaxda mideynta.

**Haddii maxkamadda ogaato in halis ay jirto, maxkamadda waxay sameyneysaa Amar. Amarka wuxuu leeyahay:**

- Haddii adiga, Waaxda, qof kale helayo hayntao canugaaga;
- Halka canugaaga ku noolaanayo;
- Haddii qiimeynada iyo/ama adeegyada looga baahanyahay adiga iyo xubnaha kale ee qoyska; iyo
- Haddii ay tahay inaad ka fogeysid in dadka qaar aysan canugaaga xiriir la yeelan.

Mazkamada waxay sidoo kale gelin kartaa natiijooyinka ku saabsan haddii aad awoodi kartid inaad bixisid taageerada canuga, iyo, haddii ay sidaas tahay, intee ayaad bixineysaa.

haddii aadan ku raacin halista natiijada go'aanka maxkmadda, waa inaad kala hadashaa qareenkaaga haddii aad ka racfaan qaadatay go'aanka. ("Racfaanka" waa codsi qoran ee ku socdo maxkamad kale si dib loogu eego, oo loo badelo

ama dib loo badelo go'aanka maxkamadda dacwada. Xaalada PC, Maxkamadda degmada waa maxkamadda dacwad qaadista. Racfaanka waxaa loo gudbinayaa Maxkamadda Garsoorka Sare.)

Aad ayay muhiim kuugu tahay inaad ka qeybgashid oo aad ka qeybqaadatid Dhageysiga Dacwada ee Halista ah. Haddii aadan ka qeybgalin, waxaa la gelinayaa xaquuqdaada waalidnimada halis.

Haddii maxkamadda geliso Amarka Halista, la dulmar amarka qareenkaaga isla markaas. Haddii amarka u baahanyahay inaad heshid adeegyo ama taageero, hubi inaad fahamsantahay waxa ay kuwaan yihiin iyo sida dhabta ah waxa aad u baahantahay inaad sameysid si aad ugu hogaansantid. Si buuxdo uga faa'iideyso taageerooyinka iyo adeegyada lagu siiyay. Raac qorshaha, oo la xiriir shaqaalahaaga dacwada iyo qareenka.

## QEYBTA 7 — Maxaa loo qabtaa Dhageysiga Dacwada ee Dib u eegida garsoorka?

Haddii maxkamad sameyso Amarka Halista, waa in dib loo eegaa dacwadaa ugu yaraan hal jeer lix (6) bilood walba. Adiga, waalidka kale ee canugaaga, AAG, ama Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL) canuga ayaa weydiin karo maxkamadda inuu dib u eego dacwada dhawaan. Dhageysiga dacwada imaanshahaan waxaa loo yaqaan Dib u eegida Garsoorka.

Dhageysigaan dacwada, maxkamadda dib ayay u eegtaa waxa ku dhacay dacwada tan iyo taariikhda ugu dambeysay ee dacwada oo go'aansataa waxa dhacay marka xiggo. Hadafka heerkaan waa daryeelka muddada dheer iyo badbaadada canugaaga. Maxkamadda waxay ku weydiineysaa:

- Miyaad sameysay isbadelo wanaagsan ama aad sheegtay arimaha aad ugu baahneyn inaad ku sheegtid Amarka Halista?
- Miyaad yareysay ama baabi'isay arimaha u hogaamiyay Amarka?

Maxkamadda ayaago'aansan karto in dacwada laga gudbo (la soo afjaro), iyo canugaaga lagu soo celiyo hayntaada; dadaalada mideyntaas waa inay socdaan; ama Waaxda waa inay joojisaa dadaalada mideynta. Go'aanka lagu soo afkarayo mideynta ma ahan mid sahlan, iyocaadi ahaan waxaa la sameeyaa kadib dadaalada celceliska ah ee lagu mideynayo wuu kuguuldareystay tiro ku fillan oo waqti ah.

Waxaa laga yaa hal ka baban Garsooraha Dib u eegista, waxay ku xirantahay xiliga xaqiiqaha dacwadaada.

WAA TIXRAAC KALIYA

## QEYBTA 8 — *Waa maxay Joogteynta Qorsheynta Dhageysiga Dacwada iyo goorta la qabanayo?*

Maxkamadda caadi ahaan waxay sidoo kale qabata Joogteynta Qorsheynta Dhageysiga Dacwada oo 12 bilood gudahood ee goortii canugaaga galay daryeelka koriyaha. Joogteynta Qorsheynta Dhageysiga Dacwada, maxkamadda waxay diirada saartaa waa waxa ku jiro danaha canugaaga ee muddada dheer, oo ay ku jiraan haddii ay tahay in canugaaga:

- Laguu soo celiyo;
- Uu daryeelo masuul joogta ah;
- Lagu meeleeyo qaraabo ku haboon oo rabo;
- Lagu meeleeyo korinta; ama
- Lagu meeleeyo diyaarinta kale ee noolaanshaha joogtada ah ee qorsheysan.

Joogteynta Qorsheynta Dhageysiga Dacwada waxaa la qaban karaa isla waqtiga Dib u eegida Garsoorka (fiiri Qeybta 7).

## QEYBTA 9 — Waa maxay Joojinta Xaquuqaha Shaqsiga?

Haddii Waaxda aaminsantahay inaadan awoodin ama aadan rabin inaad xalisid halista xadgudubka ama dayacaada canugaaga, waxay noqon kartaa Codsiga feelka ee lagu Joojinayo Xaquuqahaaga Waalidnimada. Waxaad sidoo kale si iqtiyaar ah u ogolaan kartaa Joojinta Xaquuqaha Waalidnimada haddii aad u maleysay inay sidaas tahay danaha ugu wanaagsan ee canugaaga. ka hor inta aadan gaarin go'aanka, waa inaad kala tashataa dooqyadaada qareenkaafa.

Haddii aadan ku raacin Joojinta Xaquuqahaa Waalidnimada, maxkamadda waxaa kaliya oo ay amreysaa in midaan lagu sameynayo haddii loo arko cadeyn aad u xoogan (cadeyn "cad oo qancin leh) kadib dhageysiga dacwada oo hal ama ka badan ee afarta xaqiiqo ee xigga ka jiraan:

- Aadan rabin ama kuu suurtogaleyn inaad ka illaalisid canugaaga halista, iyo in xaaladahaan ay isbadeli karaan ee gudaha tirada si macquul ah loogu xisaabiyay si ay u buuxiso baahiyada canuga; ama

- Aadan rabin ama aysan kuu suurtogelin inaad ka masuul noqotid canugaaga ee gudaha tirada waqtiga macquulka ah ee la xisaabiyay si loo buuxiyo baahiyada canuga; ama

- Canugaaga waa la dayacay; ama

- Aad ku guuldareysatay inaad sameysid dadaal dhab ah wanaagsan ee lagu dayactirayo oo laguugula mideynayo canugaaga; IYO

WAA TIXRAAC KALIYA

Joojintaas xaquuqaha waalidnimadaada waxay ku jirtaa danaha ugu wanaagsan ee canugaaga.

Afarta xaqiiqo kore waa sharuudaha sharciga. Qareenkaaga ayaa usuurtogaleyso inuu sharaxo sida maxkamadda ugu isticmaali karto sharuudaha dacwadaada gaarka ah.

Sida dhageysiyada kale ee dacwdaa PC, waxaad xaq u leedahay inaad ka qeybqaadatid, ku marqaati kacid, oo aad cadeyn soo bandhigto. Qareenkaaga wuxuu soo wici karaa marqaatiyada si u taageero dacwadaada, oo wuxuu weydiin karaa ama baari karaamarqaatiyada Waaxda iyo Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL) canugaaga. Wakiilka maxkamaddu Magacawday (GAL) wuxuu sidoo kale ahaanayaa dhageysiga dacwada oo wuxuu gudbinayaa wargelin la jirto tallooyinkiisa ama tallooyinkeeda ee la xiriiro canugaaga.

Markii aad go'aansaneysid haddii la joojinayo xaquuqahaaga waalidnimada, maxkmadda waxay tixgelineysaa da'da canugaaga iyo lifaaqyada dadka kale, baahiyada jikiisa ama jirkeedaama dareenka, iyo ku jiro danaha ugu wanaagsan ee canugaaga.

Haddii maxkamadda ku amarto in xaquuqahaaga waalidnimada ah in la joojiyo oo aad ku raacsaneyn, waxaad kala hadli kartaa qareenkaaga haddii laga racfaan qaadanayo go'aanka.

## QEYBTA 10 — Racfaanada

Sida horay loo sheegay, racfaan ayaa laga codsadaa maxkamado kale duwan si dib loogu eego, oo loo badelo ama dib loo badelo go'aanka maxkamadda dacwada. Dacwadaha PC, kaliya Amarada Halista, Joojinta Amarada Xaquuqaha Waalidnimada, iyo Amarada Daaweynta Caafimaadka (haddii maxkamadda amartay daaweynta caafimaadka ee canugaaga) ee Maxkamadda Degmada waa laga racfaan qaadan karaa.. Racfaanada Illaalada Carruurta waxaa si toos ah looga racfaan qaataa Maxkamadda Garsoorka Sare Maine.

## QEYBTA 11 — La shaqeynta qareenkaaga

Waalid walba ama masuulka sharciga ayaa xaq u leh inuu matalo qareenkiisa ama qareenkeeda oo qarashka Gobolka haddii waalidka ama masuulka sharciga uusan awoodin inuu lacag siiyo qareenka. Xittaa haddii aad qabtid waalidka kale ee canuga ama wada nooshihiin, midkiinaba waxaa loo xilsaarayaa qareen gaar ah.

Hubi in qareenkaaga u sheegto sida laguula soo xiriiro adiga oo ogeysiinayo isaga ama iyada ciwaankaaga ama lambarka taleefonka. Qareenkaaga si wax ku ool ah uma matali karo haddii aadan la xiriirin. Markii qareenkaaga soo waco ama kuu soo qoro, ka jawaab isla markaas.

WAA TIXRAAC KALIYA

**Qarenkaaga ayaa:**

- Kula kulmi doonaaa dhageysi iyo shirar walba ka hor oo dacwdaa oo ka hadlaa adiga iyo danahaaga ee maxkmadda;
- Kugu caawiyaa fahamka xaquuqahaaga, erayada sharciga iyo sharuudaha ee Amarka Halista, Qorshaha Mideynta iyo waraaqaha kale ee dacwada;
- Sharax waxa laga filanayo dhageysiga dacwada iyo shirarka; iyo
- Soo bandhiga cadeynta oo ugu dooda matalaadaada dhageysiga dacwada.

## QEYBTA 12 — La shaqeynta shaqaalaha dacwada ee Waaxda

Waxaad heleysaa fursada lagula shaqeynayo hal ama shaqaalaha dacwada Waaxda oo badan oo heerar kala duwan inta lagu jiro dacwada PC. U isticmaal kulamadaan sida fursadaha lagu sheegayo walaacyada, wadaag fikradaha, weydii su'aalaha, oo ku xiranadeegyada iyo taageerada laga yaabo inaad u baahatid si markaas lagaaga caawiyo inaad u sameysid guri badbaado ah canugaaga.

Waaxda waxay isticmaashaa hagaha qoran markii ay la shaqeynayaan qoysaska dacwada PC. Waxaad u arki kartaa caawin lagu aqrinayo jaheynadaan, ama loogula fiiranyo qareenkaaga haddii aad su'aalo qabtid ee ku saabsan iyaga. Jaheynada, waxaa loo yaqaan Nooca Hab dhaqanka Adeegyada Daryeelka Canuga, waxaa laga heli karaa onleenka: www.maine.gov/dhhs/ocfs/cw/practicemodel.shtml.

Haddii aadan laheyn kumbuyuutar, weydii shaqaalaha dacwada koobi daabacan oo jaheynada ah. Isaga ama iyada waxaaa sidoo kale u suurtogaleyso inay ku siiyaan qalabyo kale, oo ay ku jiraan Buug-yaraha Waaxda oo Waaaldiinta iyo Masuulada Sharciga ee Dacwadahada Illaalada Canuga. Buug-yarahaan waxaa laga heli karaa onleenka www.maine.gov/dhhs/ocfs/cw/handbook.html.

## QEYBTA 13 — Barnaamijka Baaraha Daryeelka Carruurta Maine

Barnaamijka Baaraha Daryeelka Carruurta Maine waa xafiis ku taqasusay caawinta dadka la macaamilo walaacyada la xiriiro adeegyada daryeelka carruurta ee ay Waaxda bixiso. Baaraha dhinac uma eexdo oo waa ka madax banaanyahay Waaxda. Haddii adigaama qof aad ogtahay inuu dhibaato ku qabo sida Waaxda aam shaqaalaha dacwada u dhaqmayaan dacwada illaalada carruurta, waxaad kala xiriiri kartaa Xafiiska Baaraha caawin ahaan. Tusaale ahaan, haddii aad dareentid in Waaxda ay aan cadaalad aheyn u dhaxgeleyso xaquuqahaaga sida waalid, Xafiiska Baaraha waxaa u suurtogeli karto inuu ku caawiyo.

WAATIXRAACKA

Baaraha inta badan wuxuu bartaa cabashooyinka iyo arimaha ka imaanayo qaraabada, bixiyayaasha adeegyada, ama sharci dajiyayaasha gobolka. Qof walba wuxuu gudbin karaa caabshada ama walaacyada codka. La xiriir Baaraha 1-866-621-0758 ama 207-213-4773, ama ku soo dir i-meelka: ombudsman@cwombudsman.org.

Waxaad ka baran kartaa wax badan oo ku saabsan waxa Baaraha sameeyo: cwombudsman.org.

## QEYBTA 14 — Xaquuqda awowyada/ayeyooyinka iyo kuwa kale ee ka qeybgalayo oo ka qeybqaadanayo dacwada

Sharciga Maine wuxuu siinayaa in canug laga saaro gurigiisa ama gurigeeda oo lagu meeleeyo qof weyn oo qaraabo la ansixiyay markii ay suurtogal tahay. Tani mararka qaar waxaa loo yaqaan "meleynta ehelnimada" ama meeleynta qaraabada.

Waaxda waxay inta badan isku dayeysaa inay ogaato haddii meeleyn ku meelgaar ah ee canugaaga oo ay la jiraan awowga/ayeyda ama xubin kale oo qoyska waxaa u suurtogaleyso ka hor weydiinta maxkamadda inay ka qeybgasho. Ka hor inta aan lagu meeleyn canugaaga qaraabada, Waaxda waa inay hubisaa in canuga ku jirayo jawi badbaado ah iyada oo lagu sameynayo qiimeynta iyo hubinta taariikhda. Mararka qaar meeleyn ku meelgaar ah oo ay la jiraan qaraabo suurtogal ma ahan ka hor in Waaxda xareynin Codsiga PPO.

Haddii awowga/ayeyda ama qaraabada kale ay daryeel bixinayaan, isaga, ama, ama waxay helayaan ogeysiinta dhageysiyada oo xaalada oo waxay helayaan xaquuqda ay uga qeybgalaan. Haddii awowga/ayeyda ama qaraabada kaleaan daryeel bixiney, isaga ama iyada si toos ah looma ogeysiinayo dhageysiyada iyo tallaabooyinka kale ee dacwada. Isaga ama iyada waa inay weydiiyaan ogolaanshaha maxkamadda inay ka qeybgalaan dhageysiga dacwada ama ka qeybqaataan dacwada. Codsiga looga qeybgalayo ama looga qeybqaadanayo waxaa lagu sameyn karaa maxkamadda iyada oo lala xiriirayo xafiiska karaaniga ee maxkamadda halka dacwada PC laga maqlayo.  Codsiyadaan waa inay ahaadaan qoraal ahaan.

Waxay ku xirantahay xiliga xiriirka qofka canuga la leeyahay, iyo maxkamadda waxay u xilsaari kartaa qofka sida:

- "Qofka daneynayo," waxaa laga wadaa qofka ka qeybgali karo oo kormeeri karo maxkamadda dacwadaha kaliya;
- Ka qeybqaataha," waxaa laga wadaa qofka laga yaabo inuu ka qeybgalo, kormeero, oo ku marqaati furo dacwadaha maxkamadda

WAA TIXRAAC KALIYA

kaliya, laakin laga yaabo inaysan joogin ama marqaatiyada la baarin; ama

- “Farageliyaha,” waxaa laga wadaa qofka leh isla xaquuqaha oo dacwada sida xisbiga (waalidka) wuu leeyahay, illaa haddii kale ay qorto maxkmadda.

Si markaas looga qeybgalo ama looga qeybqaato dacwada PC oo awood walba ah, qofka waa inuu muujiyaa in isaga ama iyada leeyihiin xiriir weyn ee canuga iyo xiisaha fayo qabka canuga. Maxkamadda  waa inay go'aansataa in ka qeybqaadashada ay tahay danaha ugu wanaagsan ee canugaaga. Qof walba waa loo ogolyahay maxkamadda inuu ka qeybgalo ama ka qeybqaato dacwada PC waxay quseysaa isla sharuudaha qarsoodiga iyo siideynta ee sharciyada illaalada canuga sida ka qeybqaatayaasha kale.

## QEYBTA 15 — Dulmarka xaquuqaha iyo masuuliyadaha dacwada PC

### xuquuqaahaaga

**Sida waalid ama masuul sharci ah, waxaad leedahay xaquuyo badan ee dacwada PC, oo ay ku jiraan xaquuqda:**

- Kuugu Matalo qareen oo qarashka Gobolka ah haddii aadan awoodin inaad bixisid qareen;
- Hel koobiyada dhammaan waraaqaha iyo macluumaad loo gudbiyay dacwada;
- Lagu ogeysiiyo dhammaan dhageysiyada maxkamadda iyo dhacdooyinka kale ee maxkmadda;
- Diidid ama qiratid bayaanada la soo bandhigay Codsiga;
- Soo bandhig dhinacaaga dacwada maxkamadda oo ka hortag dacwada Waaxda; iyo
- Booqo canugaaga iyada oo dacwdaa furantahay, illaa maxkamadda ogaato in booqashooyinka aysan dan ugu jirin canuga.

Illaa maxkamadda sameyso “amarka soo afjarida mideynta,” waxaad sidoo kale leedahay xaquuqda lagu helayo Qorshaha Mideynta cad, qoran, adeegyada qoran iyo taageerooyinka lagu caawinayo xalinta dhibaatada u hogaamisay buuxinta Codsiga.

### Xaquuqaha canugaaga

**Canugaaga wuxuu xaq u leeyahay inuu:**

- badbaado ahaado oo ay kormeeraan daryeelayaasha ku haboon;
- haysatid cunto kugu fillan, dhar, iyo hoy;

WAA TIXRAAC KALIYA

- Ka illaalsanaatid xadgudub jirka, galmada, iyo dareenka iyo dayacaada; iyo
- Heshid daawada caafimaadka iyo xaaladaha dareenka.

### Ma jiraan laba dacwad oo isku mid ah.

Hagahan wuxuu sharaxayaa waxa ka dhici karo heerarka kala duwan ee dacwada PC. Fadlan xasuuso, si kastaba, ma jiraan labo dacwad oo isku mid ah. Go'aan walba maxkamadda sameeyo wuxuu ku saleysanyahay xaqiiqaha gaarka ah iyo cadeynta hortaalo. Tallaabooyinka aad u qaaday jawaab ahaan xaqiiqaha xaqiiqaha dacwadaada waxay si weyn u saameyn kartaa go'aamada maxkamadda oo illaa dacwada, iyo natiijada ugu dambeyso ee dacwada.

WAA TIXRAAC KALIYA

# LIFAAQA — macluumaadka guud

## Hoyga Curyaamada

Laanta Garsoorka Maine waxay sameeyaan dadaal walba oo macquul ah oo hoy loogu siinayo iyo gargaarada maqalka iyo adeegyada dadka curyaanka ah si bilaash ah si markaas ay u galaan maxkamadda iyo adeegyadeeda. Fadlan kala hadal qareenkaaga wax ku saabsan diyaarinta hoyada; la xiriir Xiriiriyaha Gelitaanka Maxkamadda ee 207-822-0718, TTY: Qadka Maine 711, ama accessibility@courts.maine.gov iyo codsiyada; ama la xiriir xafiiska karaanigaee maxkamadda halka dacwadaada laga maqlayo. Qadka foomka Codsiga Hoyga Curyaannimada ee websaydka Laanta Garsoorka waxaa laga heli karaa: www.courts.maine.gov/maine_courts/admin/ada/accommodation-request.pdf

## Helitaanka Luuqada

Laanta Garsoorka Maine waxay siisaa turjubaano iyo dadka leh Aqoonta Ingiriiska xadidan (LEP) ama dhagoolka ah ama ku adagtahay maqalka oo si bilaash ah ku ah si markaas ay u helaan maxkamadda iyo adeegyadeeda. Laanta Garsoorka waa inuu sidoo kale siiyaa turjubaanka ASL goobjoogayaasha maxkamadda oo camoolaha ah ama ku adagtahaya maqalka xiliga la codsado. Fadlan kala hadal qareenkaaga diyaarinta turjabaan; si toos ah ula xiriir Taqasuska Gelitaanka Xiriirada oo toos ah 207-822-0703, TTY: Qadka Maine 711, ama interpreters@courts.maine.gov iyo codsiyada; ama la xiriir xafiiska karaanigaee maxkamadda halka dacwadaada laga maqlayo. macluumaadka dheeraad ee caawinta turjubaanka waxaa laga heli karaa websaydka Laanta Garsoorka ee: www.courts.maine.gov/maine_courts/admin/interpreters

## Ujeedooyinka Warbixinta Kaliya

Hagahan waxaa loogu tallogalay inay ku caawiso Waalidiinta, masuulada sharciga, iyo xubnaha qoyska ee ay saameysay dacwada Illaalada Carruurta inay si wanagsamn u fahmaan waxa ka dhacay dacwada. Si aad uga dhigtid hagaha mid aad loo aqrin karo, nidaamka maxkamadda iyo sharciyada ku lugleh waa la soo koobay.

Ha ugu tiirsanaan macluumaad ku taal hagidaan sida sharaxaad dhameystiran oo dhammaan sharciyada ka ciyaari karo dacwada PC. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan nidaamka sharciga iyo maxkmadda, weydii qareenkaaga.

WAATIXRAAC KALIYA

## ILLAHA LA DOORTAY

Koobiga hagahan iyo macluumaadka kale ee la xiriirto Laanta garsoorka waxaa laga heli karaa shabakada Laanta Garsoorka: www.courts.maine.gov. Warbixinta dacwadaha Illaalada Carruurta waxaa sidoo kale laga heli karaa: www.courts.maine.gov/family/child_protect.html. Warbixinta ee Illaaliyaha Maxkamadda xilsaartay waxaa laga heli karaa: www.courts.maine.gov/maine_courts/family/gal.

Hay'adaha hoose waxay bixin karaan macluumaadka ama ku caaiyaan waalidiinta, masuulada sharciga, iyo dadka kale ee xiiseynayo dacwadaha PC. Shaqaalaha dacwadaada ee dacwada PC waxaa u suurtogali karto illaha iyo macluumaad.

### Caawinta Sharciga ee Pine Tree

ptla.org

Hay'ada aan faa'ido doonka aheyn ee wadanka oo dhan waxay bixinayaan caawin bilaash ah, oo rayid ah ee la siinayo dadka daqliga hooseeyo ee ku nool Maine oo arrimo kala duwan iyo noocyada dacwadaha. Hagaha sharciga onleenka Pine Tree ee dacwadaha Illaalada Carruurta Maine waxaa laga heli karaa: ptla.org/maine-child-protection-proceedings#talk_to_DHHS.

### Barnaamijka Baaraha Daryeelka Carruurta ee Maine

cwombudsman.org

Xafiis madax banaan, xafiiska takoor la'aanta ee caawiyaa dadka qabaa walaacyada ku saabsan sida Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada qaabilayo dacwada Illaalada Carruurta ama adeegyada daryeelka canuga. Qof walba ee qabaa walaacyada ama caabshada wuxuu kala xiriiri karaa Baaraha 207-213-4773 ama 1-866-621-0758. Waxaad sidoo kale i-meel ku diri kartaa xafiiska oo: ombudsman@cwombudsman.org.

### Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada, Xafiiska Adeegyada Carruurta iyo Qoyska

www.state.me.us/dhhs/ocfs/cw

Buug-yaraha loogu talagalay Waalidiinta: Hagaha Adeegyada Illaalinta Ilmaha: www.maine.gov/dhhs/ocfs/cw/handbook.html

Xeerka Adeegyada Ilmaha iyo Qoyska:: www.maine.gov/dhhs/ocfs/cw/policy

WAATIXRAAC KALIYA

WAA TIXRAAC KALIYA

Maine Judicial Branch
Administrative Office of the Courts
1 Court Street, Suite 301
Augusta, Maine 04330
www.courts.maine.gov

*Waxaa taageray deeqda ka imaatay Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Bulshada Mareykanka Maamulaha Carruurta iyo Barnaamijka Hormarinta Maxakamadda Qoyska*